Stockholms stad

# Carruurta waddanka ku cusub ee dugsiyada Stockholm

Waxay ku socotaa adiga ka waalid ahaann ama mas´uulka carruurta oo aan lahayn waxbarashada asaasiga ee dalka Swedan





## Dhaqanka anshaxa ku saleysan ee dugsiyada dalka Sweden

Dugsiyada Sweden waxay ku dhisan yihiin habka dimuqaraadiga ah. Dugsigu wuxuu ka shaqeeyaa sinnaanta ragga iyo dumarka, xurriyadda hadalka iyo in dadka oo dhan ay isku qiimo yihiin. Taasi waxay ku qoran tahay sharciga dugsiyada.

Dugsigu waa in carruurta oo dhan ay ka helaan aqoon siineysa saldhig ay ka ambaqaadaan hadda iyo mustaqbalka. Hawsha dugsigu waa in ay ardayda oo dhan ka kaalmeeyaan kartida iyo horumarinta intii suurtagal ah. Gabdhaha iyo wiilasha intuba waa in ay ka qeyb qaataan maaddooyinka iyo casharrada dugsiga laga dhigo oo dhan.

Dugsigu wuxuu barayaa sida la is kula dhaqmayo iyo waxa bulsho dimuqaraadi ah macnaheedu yahay.

Waxbarashadu ma aha waxbarasho diimeed. Waxay taasi ka dhigan tahay in macallimiintu ay ardayda saameyn ku yeelan karin iyagoo xag diimeed ku guubaabinaya iyo diin gaar ah keliya aysan saameyn ku yeelan karin ardyga iyo waxa ay waxbarashadu ka kooban tahay.

**Ku soo dhawow dugsi ku yaalla magaalada Stockholm**

Magaalada Stockholm waxaa ku yaal dugsiyo ay leeyihiin degmooyinka iyo dugsiyo si gaar ah loo leeyahay. Wax lacag ah kama bixinaysid waxbarashada carruurtaada. Dugsiyada dhammaantood waxay raacayaan isku hal manhaj oo waxbarasho, waxayna ka wada shaqeynayaan in ay buuxiyaan isku hal shardi oo aqooneed.

## Waa kee dugsiga uu canuggeygu dhiganayo?

Ardayda dhiganeysa dugsiga xannaanada ilaa iyo fasalka 6aad waxaa lagu meelaynayaa dugsi ku dhaw deegaanka aad ka diiwaan gashan tahay. Ardayda fasalka 7aad ilaa iyo 9aad waxaa lagu meelayn karaa karaa dugsi ka fog iyadoo ay ku xiran tahay in dugsiga uu boos ka bannaan yahay.

Waxaa sidoo kale carruurtaada uga codsan kartaa boos dugsi kale oo aan ahayn kan ay magaalada Stockholm kugu casuuntay.

Ma dooneysaa in aad boos ka codsatid mid kale oo ka mid ah dugsiyada Stockholm? Markaas waxaad Google-ka ka raadin kartaa ”Söka skola Stockholm”.

Ardaygu wuxuu billaabi karaa dugsiga uu codsaday haddii uu dugsigaas boos ka bannaan yahay.

Haddii cunuggaaga lagu meeleeyo dugsi ku yaal meel guriga ka fog, dugsiga ayaa bixinaya lacagta kaarka SL-ka si uu canuggaagu dugsiga u tegi karo ugana soo noqon karo dugsiga. Si uu u helo kaarka SL-ka waa in masaafada uu dugsiga u jiro ay ahaataa:

- ugu yaraan 2 km marka laga hadlayo ardayda fasalka dugsiga xannaanada ilaa iyo fasalka 3aad,
- ugu yaraan 3 km marka laga hadlayo ardayda dhigata fasalka 4aad ilaa iyo 6aad. ,
- ugu yaraan 4 km marka laga hadlayo ardayda dhigata fasalka 7aad ilaa iyo 9aad,
- ugu yaraan 6 km marka laga hadlayo ardayda dhigata dugsiga sare.

Haddii aad doorato dugsi kale oo aan ahayn kii laguugu soo casuumay, wax mas´uuliyad ah kama saarna dugsigaas in canuggaaga uu ka dhiibo kaarka SL-ka.



## Waa imisa kharajka ku baxaya dugsiga?

Canuggaaga waxaa la siinayaa waxyaabaha uu waxbarashada ugu baahan yahay sida qalimo iyo buugaagta qoritaanka marka uu dhiganayo dugsiga asaasiga ah. Ardayda dhigata dugsiga sare iyaga ayaa iska bixinaya lacagta qalimada iyo buugaagta. Buugaagta qaarkood waa ay soo amaahan karaan inta uu maaddadaas dhiganayo. Uma baahnid in aad wax buugaag ah u soo iibisid canuggaaga. Dugsiga asaasiga ah wuxuu canuggaagu heli karaa kumbuyuutar ama surfplatta haddii waxbrashada ilamha looga baahantahay. Ardayda dugsiga sare waxay amaahan karaan kumbuyuutar ama surfplatta inta ay dugsiga ka diiwaan gashan yihiin.

Dugsiga asaasiga iyo dugsiga sare waxaa la siinayaa canuggaaga qado lacag la´aan ah. Cunto gaar ah ayaa la siinayaa canuggaagu haddii uu leeyahay sabab caafimaad, tusaale ahaan xasaasiyad. Cunto gaar ah ayaa la siinayaa intii suurtagal ah haddii ay jirto sababo diimeed ama waxa uu aaminsan yahay. Cunto gaar ah waxay tusaale ahaan noqon kartaa cunto  uusan hilib doofaar ku jirin ama cunto khudaar ka sameysan. Dugsiga weydii sida aad ku codsan kartid cunto gaar ah.

Xagga maaddada ciyaaraha fudud iyo caafimaadka waa in canuggaagu soo qaataa dhar iyo kabo ku habboon si uu u orodo una dhaqdhaqaaqo. Kuwaas lacagtooda adiga ayaa bixinaaya.



## Muxuu yahay farqiga u dhexeeya fasalka diyaarinta iyo toos u meelaynta fasal?

Dugsiyada degmooyinka Stockholm waxaa la geeyaa marka hore fasalka diyaargareynta ee fasallada 7aad ilaa 9aad dhammaan ardayda waddanka Swedan ku cusub ee joogay hal sano in ka yar.

Fasalka **diyaargareyntu,** waa koox waxbarid ah oo loogu tala galay ardayda waddanka ku cusub. Halkaas waxay si dheeri ah uga shaqeynayaan luqadda Iswidhishka. Ardaygu wuxuu ku qoran yahay fasal caadi ah uu la qaadanayo marka horeba maaddooyinka qaarkood isla markaasna wuxuu dhiganaya fasalka diyaargareynta. Mar kasta uu ardaygu luqadda Iswidhishka sii barto, waxaa sii kordhaya maaddooyinka uu la dhiganayo fasalkiisa caadiga ah.

Ardayda dhigata dugsiga xannaanada ilaa iyo fasalka 6aad waxaa si toos ah loo geyn karaa waxbarashada caadiga ah - waxaa lagu magacaabaa **meelayn toos ah** - ama fasal diyaargareyn ah. Taas waa ay ku kala duwan yihiin dugsiyadu. Maamulaha dugsiga ayaa go´aamianaya meelaynta tooska ah ama fasalka diyaargareynta.



## Canuggeygu ma dhigan karaa dugsi in kasta oo uu ka weyn yahay 16 sano?

Haddii uu canuggaagu u dhexeeyo 16 ilaa 18 sano wuxuu codsan karaa dugsi sare.

**Barnaamijka horudhaca luqadda** waxaa loogu tala galay ardayda aan haysan shahaadada luqadda Iswidhishka iyadoo ay sababtu tahay in ay dalka Sweden ku cusub yihiin. Ulajeeddada luqadda horudhaca ah waa in ardaygu marka hore uu dhigto Iswidhishka sida luqaddiisa labaad. Markaas ka dib ayuu dhiganayaa maaddooyinka kale ee asaasiga ama waxbarashada kale oo ardaygu u baahan yahay si uu waxbarasho uu u sii wato ama shaqo u helo.

Dugsiga sare waxaa jira barnaamij xirfadeed iyo barnaamij waxbarasho oo isu diyaarinta jaamacadda. Si aad ugu qalanto waxbarashada barnaamij xirfadeedka waxaa lagaaga baahan yahay shahaaddo in aad ku gudubtay imtixaanka ugu yaraan siddeed maaddo oo dugsiga asaasiga. Barnaamijka isu diyaarinta jaamacadda waxaa lagagaa baahan yahay shahaaddo in aad ku gudubtay ugu yaraan kow iyo toban maaddo. Afka luqadda hooyo waa mid ka mid maaddooyinkaas.

Wixii dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada dugsiga sare iyo qaadashada ardayga heer jaamacadeed ama dugsiyada xirfadaha, ka akhriso: www.utbildningsinfo.se

## Waa maxay gacan qabashada xagga waxbarashada iyo afka hooyo dhigiddiisa?

Si uu canuggaagu uga helo dugsiga fursado wanaagsan oo uu wax ku barto kuna horumaro, wuxuu xaq u leeyahay in uu helo gacan qabasho xagga waxbarashada haddii uu ardaygu middaas u baahan yahay. Gacan qabasho waxbarasho oo luqaddiisa hooyo ah waxay ka dhigan tahay in canuggaaga taageero waxbarasho uu helo si uu u fahmo maaddooyinka la dhigayo, waxaana fahamsiinaya gacan qabtaha xagga waxbarashada, kaas oo garanaya ardayga luqaddiisa hooyo ama luqadda waxbarashadiisii hore. Cilmi baaris lagu sameeyay ardayda ku hadasha luqadaha badan waxay muujineysaa in gacan qabtaha waxbarasho uu horumar u yahay ardayga horumarkiisa marka la eego luqadda Iswidhishka iyo maaddooyinka kaleba.

Dhigidda maaddada afka hooyo waxaa looga dan leeyahay in ardaydu ay horumar ka sameeyaan aqoonta luqaddooda hooyo. Cilmi baaris la sameeyay waxay muujineysaa in ardayga helay fursad ah gacan qabasho xagga waxcbarasho in uu horumar ku sameeyo afka hooyo hadal ahaan, qoraal ahaan iyo dugsigaba, taas waxay xoojinaysaa awooddiisa waxbarasho haddii ay noqon lahayd luqadda Iswidhishka ama haddii ay noqon lahayd maaddooyinka kale. Waxay taasi taageeraysaa in canuggaagu uu si fiican ugu guuleysto dugsiga. Cilmi baaristu waxay talo ku siinaysaa waaliddiinta in ay u oggolaadaan carruurtooda u dhigista afka hooyo. Shahaaddo ayaa la isku siiyaa maaddada afka hooyo. Shahaaddadaas waa laguu xisaabinayaa marka aad codsanayso dugsi sare iyo jaamacad.

Codsiga dhigashada afka hooyo waxaad ka codsanaysaa dugsiga.





## Muxuu sameeyaa hagaha waxbarashada - iyo xirfadaha dugsiga?

Dugsiga asaasiga iyo dugsiga sare waxaa jooga hagaha waxbarashada- iyo xirfadaha. Waxay aqoon u leeyihiin waddooyinka loo maro waxbarashada, xirfadaha iyo suuqa shaqada. Marka canuggaagu uu sii wato waxbarashada dugsiga asaasiga ama dugsiga sare kadib, waxaa adkaan kara in la fahmo fursadaha jira iyo shuruudaha looga baahan yahay qofka in loo qaato waxbarasho kala duwan. Waa muhiim in ardaygu uu helo  aqoon badan oo suurta gal ah inta uu doorashada sameyn. Hagaha waxbarashada- iyo xirfadaha wuxuu ka caawinayaa canuggaaga in uu ogaado fursadaha waxbarasho oo uu kala dooran karo midda uu doonayo, wuxuuna ka caawinayaa in uu waxbarashadiisa horay u sii wato.





## Sidee adiga iyo dugsiga aad u wada shaqeyn kartaan sida canuggaaga ugu wanaagsan?

Adigu muhiim ayaad u tahay waxbarashada canuggaaga, dugsiguna wuxuu ku dadaalayaa in uu xiriir wanaagsan kula yeesho. Waxaa laguugu casuumi doonaa kulamo waaliddiin iyo wada hadal horumarineed. Shirka waaliddiinta waxaad kula kulmeysaa macallinka canuggaaga. Kulanka waaliddiinta waxaad ku ogaaneysaa waxa ay ardaydu dugsiga ku bartaan iyo sida fasalka canuggaagu uu u shaqeeyo.

Waxaa laguugu casuumi doonaa wada hadal horumarineed. Wada hadalku wuxuu ku saabsan yahay canuggaaga. Markaa waxaad adiga iyo canuggaagu la kulmeysaan macallinka si aad uga wada hadashaan sida canuggaagu uu horuumar ugu sameyn lahaa maaddooyinka kala duwan. Waxaad sidoo kale ka hadli doontaan horuumarka canuggaaga uu ka sameeyay dad la dhaqanka.

Ku soo dhawow in aad dugsiga canuggaaga la xiriirtid haddii aad qabtid su´aalo ama wax aad is weydiineysid oo ku saabsan waxbarashada dugsiga ee canuggaaga. Dugsiga wuxuu ku siinaya macluumaad ku saabsan sida ugu fiican aad ula soo xiriiri kartid shaqaalaha dugsiga.







## Waa maxay sababta aad ugu baahan tahay turjubaan kulamada dugsiga?

Waa muhiim in aad adigu ka waalid ahaan aad tagtid kulamada dugsigu uu kugu casuumayo. Si aad cunuggaaga uga caawinto sida ugu fiican, waana muhiim in dhammaan ay fahmaan waxa shirka looga hadlayo. Sidaas darteed waxaad xaq u leedahay turjubaan. Ma habboona in qaraabo ama walaal weyn uu beddelkaaga galo ama uu kuu soo raaco turjubaan ahaan. Dugsiga ayaa turjubaan kuu diyaarinaya hadba luqadda aad ku hadashid.

Qoyska dhamaantood waxaa waajib ku ah in ay luqad cusub bartaan, inta badan carruurta ayaa si dhakhsi leh horumar ka sameeya luqadda cusub barashadeeda. Waxaa mahaddaas leh dugsiyada ay dhigtaan carruurtaas. Taasi waxay keeneysaa in dadka waaweyn ay carruurtooda u isticmaalaan turjubaan ahaan xaalado kala duwan.

Warbixinno cilmi ku saleysan ayaa muujinaya in arrintaas ay u xun tahay carruurta iyo waalidkaba. Carruurta waxa ay qaadayaan mas´uuliyad ay naftooda macluumaad ka gudbiyaan taas oo ay adag tahay in la maareeyo. Waalidku wuxuu halis ugu jiraa in uu ku xirnaado cunuggiisa luqad ahaan, taas oo aan u fiicneyn xiriirrka qoyska gudihiisa. Waxaa intaa dheer in ay taasi ka dhignaan karto in dugsiga iyo waaliddiintuba ay doortaan in aysan ka hadlin waxyaabo muhiim ah oo canugga ku saabsan.

Haddii labada waalid ay yimaadaan kulanka dugsiga oo mid idinka mid ah uu Iswidhishka si fiican ugu hadalyo, kan kalana uusan si fiican Iswidhishka ugu hadlin, sidaas ay tahayna waa in aad turjubaan ka ballansataa dugsiga.

Hawsha turjubaanku waa in si dhexdhexaadnimo ku jirto uu macluumaadka ugu kala gudbiyo dadka wada hadlaya. Wax lacag ah oo aad bixineysid ma jirto si aad turjumaan kulanka ugu haysatid.

## Sida aqoonta loo arko dugsiyada iswidhishka

Nidaamyada dugsiyada kala duwan waxay ahamiyad siiyaan aqoon kala duwan. Dugsiyada Iswidhishku waa ay ka tageen in ay qiimeeyaan kartida ardayga ee ah in uu xaqiiqda kor ka xafido si uu dib uga sheekeeyo, oo waxay u gudbeen aragti aqooneed oo la qiimeynayo kartida ardayda ee ah in ay isticmaalaan aqoontooda xaqiiqada ah. Taasi waxay dhici kartaa iyadoo ay ardaydu ku tababaranayaan in ay is barbar dhigaan macluumaadka, waxna kala soo baxaan, kana doodaan; tusaale ahaan sababaha iyo waxyaabaha ka dhalan kara.

Ardayduna sida oo kale waa ay horumarin karaan kartidooda ku aaddan in ay fikradahooda qeexaan, doodna ka soo jeediyaan.

Haddii arday fasalka 4aad ilaa 9aad ay ku adkaato ama ku guuldarreysto hal ama dhawr maaddo hadafkii laga doonayay, wuxuu dugsigu u soo bandhigayaa in xilliga fasaxa wax loo dhigo. Ardayda aan fasalka 9aad kaddib haysan shahaaddo uu ku galo dugsi sare. Sidaa awgeed waxaa loo soo jeedinayaa dugsi loo dhigo ardayga xilliga xagaaga ee fasaxa ah. Dugsiga fasaxa waxaa ku siin karaa dugsi kale oo aan ahayn kan ardayga uu dhigto.

Dugsigu wuxuu dhammaan ardayda siinayaa taageero xagga casharrada ah inta waqtiga dugsiga lagu jiro.

La xiriir macallinka canuggaaga haddii aad su´aalo ka qabtid wax dhigidda, cashar caawinta ama dugsiga fasaxyada.



## Asaaska dugsi dhigasho wanaagsan oo arday kasto loogu tala galay

Dhammaan ardayda waa in ay dugsiga dhexdiisa ammaan ku dareemaan, waana in ay xaaladaha ugu fiican ku helaan dugsiga dhexdiisa si ay wax u bartaan, horuumarna u sameeyaan.

**Dugsigu waxuu**

- canuggaaga siinayaa fursad uu aqoon fiican ku yeesho iyo dad la dhaqan wanaagsan
- canuggaaga ka caawinayaa in uu fahmo hadafka maaddo kasta iyo sannad dugsiyeed kasta si canuggaagu uu u qaadi karo mas´uuliyadda waxbarashadiisa
- canuggaaga ka caawinayaa in uu fahmo waxa isagu qof ahaantiisa uu horuumarinayo si uu u gaaro hadafka aqooneed
- canuggaaga baraayaa in uu lahaado hab dhaqan dimuquraadiyad ku dhisan
- si firfircoon uga shaqeynayaa sinnaanta iyadoo gabdhaha iyo wiilasha loo qaabilayo iyagoo isku qiime ah
- ka shaqeynayaa in canuggaaga aan loo geysan ama uusan arday kale u geysan dhibid, bahdilid ama takoorid, haddiiba ay dhacdo dugsiga ayay shaqadiisu tahay in uu si dhaqsi ah u joojiyo
- i joogto ah ayuu kuu siinayaa macluumaad ku aaddan shaqada dugsiga, wuuna kula soo xiriirayaa haddii ay wax welwel ah ka jiraan horuumarka canuggaaga ama xaaladda dugsiga.



## Waalid/mas´uul carruur/qof lala xiriiro

Fursadaha canugga ee ah in uu dugsiga si fiican ugu guuleysto waa ay kordhaysaa haddii ay wada shaqeynta guriga iyo dugsiga ka dhexeysa ay wanaagsan tahay. Dhawr tusaale oo ku saabsan waxa aad sameyn lahayd:

- ka qeyb gal kulamada dugsiga uu kuugu yeero
- ka qayb qaado warbixinnada dugsiga laga soo diro, tusaale ahaan warqadda toddobaadlaha ama bologga fasalka.
- sheeg haddii uu cunugaagu jiran yahay iyada oo la raacayo xeerka dugsiga.
- la xiriir dugsiga haddii aad qabtid su´aalo ama aad ka welwelaysid wax khuseeya canuggaaga.
- hubi in uu canuggaagu nastay, uuna maalin walba waqtiga ku yimaado dugsiga.
- hubi in canuggaagu uu wato buugaagta dugsiga iyo dharka ciyaaraha fudud ee maalintaas dugsiga looga baahan yahay.
- ogaw xeerarka dugsiga, kana caawin canuggaaga in uu fahmo uuna ku dhaqmo.
- u muuji shaqada dugsiga ee canuggaaga adiga oo su´aalo ka weydiinaya, tusaale ahaan
    - imminka maxaad xisaabta ka shaqeysaan?
    - Ka sheekee saddex waxyaabood oo aad maanta soo baratay.
    - Maxaa xiiso lahaa maanta dugsiga, maxayse sababtu tahay ay waxaas ugu xiisa badneyd?
    - iiga sheekee waxa uu casharku ku saabsan yahay.
    - maxay kula tahay in casharku uu sahlanaa/adkaa, sideen kuu caawiyaa?

## Joogitaan khasab ah

Ardayda billowday dugsiga asaasiga ee Iswidhishka waxaa khasab ku ah in ay soo xaadiraan. Waxay taasi ka dhigan tahay in canuggaagu uu dugsiga joogo maalin walba, iyadoo ay shardi tahay in uu caafimaad qabo. Xeerar gaar ah ayaa khuseeya fasaxyada. Weydii dugsigaaga haddii ay khasab tahay in canuggaagu uu fasax qaato iyadoo aan la joogin waqti dugsigu fasax yahay.

Ardayda dugsiga sare ee sharciga degganaashaha leh waxay xaq u leeyihiin kaalmo dhaqaale oo waxbarasho taas oo loogu tala galay waxbarasho waqti buuxa ah. Haddii ardayga maqnaashadiisu ay badan tahay, waa laga joojinayaa kaalmada dhaqaale ee waxbarasho. Taasina sidoo kale waxay saameyn kartaa kaalmooyinka dhaqaale ee laga yaabo in uu qoyskiinnu qaato.

Adiga iyo canuggaagaba waanu idin salaameynaa, kuna soo dhowaada dugsiga!





Produktion: BLOMQUIST.SE Tryck: Åtta.45 Tryckeri AB Art.nr: 15435 Utbildningsförvaltningen 2018-01 Somaliska

Stockholms stad